## Guddida Maamul-wanaagga Dawladnimada

### Kulanka 67aad – 24 Febraayo 2025, Muqdisho, Soomaaliya

### Guudmar

Guddiga Maamul-wanaagga Maaliyadeed (FGC) ayaa ku qabsaday kulankiisii 67-aad 24-kii Febraayo 2025, magaalada Muqdisho. Doodaha shirkan ayaa waxa diiradda lagu saaray arrimaha mudnaanta u leh maamulka maaliyadeed, oo ay ka mid yihiin Warbixinta Maamul-wanaagga Maaliyadeed ee 2024, qorista dastuurka ee arrimaha maaliyadeed, maaraynta waaxda batroolka, kobcinta dakhliga, iyo korjoogteynta qandaraasyada iyo heshiisyada. Xubnuhu waxay dhuuxeen warbixino ku saabsan dib-u-habaynaha socda ee maamulka maaliyadeed, iyagoo dejiyay tallaabooyinka xiga ee lagu xoojinayo hufnaanta iyo isla xisaabtanka.

### Kobcinta Dakhliga iyo Isku-dubbaridka Maaliyadeed

Xubnaha FGC waxay ka doodeen warbixino ku saabsan dadaallada lagu xoojinayo ururinta dakhliga gudaha, oo ay ku jiraan hagaajinta maamulka canshuuraha, isku waafajinta kastamada, iyo dib-u-habaynta waaxda maaliyadda. Wasaaradda Maaliyadda ayaa sii wadaysa inay si buuxda ula wareegto maamulka Nidaamka Otomaatiyada Kastamyada Soomaaliya (SOMCAS), kaas oo ah aalad muhiim u ah dib-u-habaynta casriyeynta kastamyada.

### Hannaanka Qorista Dastuurka iyo Federaalka Maaliyadeed

Doodaha ayaa waxay ku saabsanaayeen dib-u-eegista dastuurka ee socda, gaar ahaan qodobada maaliyadeed iyo saamayntooda ku aaddan maamulka maaliyadeed. Xubnuhu waxay carrabka ku dhufteen muhiimadda caddeynta hab-raacyada wadaagga dakhliga, iyagoo adkeeyay in la hubiyo isku-dhafka qodobbada maaliyadeed ee dastuurka dhammaan cutubyadiisa.

### Maamulka Waaxda Batroolka

FGC waxay warbixin ka dhageysatay Wasiirka Batroolka oo sharraxay dib-u-habaynta lagu sameynayo maaraynta waaxda. Wasaaradda ayaa waxay soo saartay xeer-wadaag ay la leedahay Wasaaradda Maaliyadda, taas oo qeexaysa habraaca bixinta Heshiisyada Wadaagga Wax-soosaarka Batroolka (PSAs). Waxaa la diyaarinayaa shuruucda Xeerka Batroolka, waxaana la qaaday tallaabooyin lagu hubinayo in dhammaan qandaraaslayaasha jira ay u hoggaansamaan shuruudaha heshiisyada PSAyada. Xubnaha FGC waxay soo dhaweeyeen dadaallada lagu xoojinayo hufnaanta iyo habraacyada saxda ah ee qandaraasyada waaxda batroolka.

### Korjoogteynta Qandaraasyada iyo Heshiisyada

Guddigu waxay ka doodeen warbixinnada la xiriira qandaraasyada iyo hab-raacyada muhiimka ah ee la xiriira iibsiga, oo ay ku jirto qorshaha Dowladda Federaalka ee horumarinta deked cusub oo Muqdisho laga dhisayo. Xubnaha FGC waxay mar kale adkeeyeen muhiimadda ay leedahay sameynta baaritaano taxaddar leh, isku-dubbaridka dowlad-goboleedyada, hufnaanta, kormeerka, iyo u hoggaansanaanta xeerarka iibsiga si loo ilaaliyo kheyraadka guud.

**Warbixinta Maamulka Maaliyadeed 2024**

Guddigu waxay dib u eegis ku sameeyeen qoraalka koowaad ee Warbixinta Maamulka Maaliyadeed ee 2024, iyagoo falanqeeyay waxyaabaha ugu muhiimsan, oo ay ka mid yihiin horumarka la sameeyay ee maamulka maaliyadda guud, kobcinta dakhliga, iyo dib-u-habaynta hay’adaha. Xubnuhu waxay ka doodeen jadwalka dhammaystirka iyo daabacaadda warbixinta.

## Gunaanad

Guddoomiyaha FGC, Wasiirka Maaliyadda, wuxuu hoosta ka xarriiqay muhiimadda ay leedahay sii wadista dib-u-habaynta maamulka maaliyadeed si loo xoojiyo adkeysiga dhaqaalaha Soomaaliya iyo awoodda hay’adaha dowladeed. Guddigu waxay mar kale xaqiijiyeen sida ay uga go’an tahay horumarinta dib-u-habaynta, xoojinta hufnaanta, iyo sugidda maaraynta maaliyadda dadweynaha. Tallaabooyinka xiga iyo jadwalka kulammada soo socda ayaa laga wada hadlay, iyadoo xubnuhu ay isla garteen in la sii wado dadaallada lagu xoojinayo arrimaha muhiimka ah ee maamulka maaliyadeed.